

Somali (Somali)
Su'aalaha Badanaa
La Isweydiiyo
ARTS @ King Street
Station

ARTS @ King Street Station

Su'aalaha badanaa la isweydiyo

Sidee ayaan kugaarayaa King Street Station (jihooyinka)?

Ciwaanka King Street Station waa [303 S Jackson St, Seattle, WA 98104](#).

Xaruntu waxay kutaalaa meel wanaagsan oo ay kukulmaan dhamaan aaga Downtown Central Business District, Pioneer Square, iyo Chinatown / International District (wadada Jackson Street ee udhaxaysa jidwaynayaasha 3aad iyo 4aad ee South).

Waxaa jiro qaabab kaladuwan oo aad kugaari karto xarunta adoo raacaaya gaadiidka dadwaynaha:

- Tareenka [Sunder](#) ee gobalada iskaga safra ayaa istaagaaya xarunta, siduu u istaago dhamaan marinada [Amtrak](#) ee wadanka oo dhan.
- Tareenka [Link Light Rail](#) wuxuu istaagaa kastanka International District, oo hal dhisme kaxigta dhanka bari astaanka.
- Qaar badan oo kamid ah marinada basaska [King County Metro](#) ayaa mara aaga astaanka, ayna kujiraan 1, 7, 36, 14.

Xage ayaan gaariga kubaakimanayaa?

Waxaa jiro geerashyo iyo baakino badan oo lacag labaxsho oo kuyaala xaafada, iyo sido kale baakinada wadada. Kafiiri [Qariirada Goobaha Baakinka Seattle](#) halkaan.

Astaanka King Street Station maleeyahay adeegga ADA (adeegga caawiya dadka naafada ah)?

Haa, waxaa jiro jaranjarada wiishka oo leh adeegga Americans with Disabilities Act (ADA, Xeerka Ameerikaanka Curyaanka) kaasoo kashaqeeya dhamaan qaybaha astaanka.

ARTS @ King Street Station wuxuu leeyahay musqulaha dhamaan rag iyo dumarba, oo leh adeegga ADA.

Goorma ayaa goobta dhaqanka loofurayaa dadwaynaha?

Xafladeena bandhiga shaqo bilaabidu waxay furmaysaa **Sabtida, Janaayo 19, 2019**. Waa [yehaw](#), bandhig cidkasta loogu yeeraayo oo loogu dabaaldagaayo muga iyo kaladuwanaashaha farshaxanka qadiimiga ah ee lagu sameeyay aaga Pacific Northwest. [Iskadiiwaangali wararkeena](#) nagalana soco baraha bulshada sida [Facebook](#), [Twitter](#), [Instagram](#), [YouTube](#), iyo bogeena qoraalada ee [ArtBeat Blog](#) si aad uhesho bayaanada aan soosaarno.

Saacadahee xaruntu shaqaynaysaa?

Laga bilaabo maalinta Talaadada ah, Janaayo 22, 2019 iyo wixii kadanbeeya, ARTS @ King Street Station saacadihiisa shaqada dadwaynuhu waxay noqonayaan **Talaadada-Sabtida, 10am-5pm, wuxuuna furnaanayaa ilaa 8pm maalmaha Khamiista ah.**

Saacadaha ay furanyihiin xafiisyada maamulku waxay sii ahaanayaan Isniinta-Jamcada, 8am-5pm.

Saacadahaan waxaa lagu go'aanshay waxaan kabaranay shaqadii xog aruurinta ahayd. Waxaan doonaynaa inaan ufurnaano ayna naheli karaan kumanaanka taraansiitka kujira iyo dadka rakaabka ah ee tareenada kusafraya kuwaasoo xarunta kabaxa maalintii asbuuc kasta, anagoo aqoonsanayna in inta badan dadka magaaladeenu ay hawlhooda dhaqanka kafaaiidaystaan saacadaha ay shaqada kamaqanyihiin.

Dabaqyadee loo astaynayaa hawlaha dhaqanka? Intee le'egyahay balaca dabaqa 3aad?

ARTS @ King Street Station wuxuu kufadhiyaa dhamaan dabaqa sadexad ee xarunta King Street Station. Dabaqaan dhexe waa 17,130 feet oo iskuwareeg ah. Waxaa jiri doona cabir dhan 10,000 sq.ft. oo loogu talagalay bandhigyada dhaqanka, uuna kujiro bandhiga farshaxanada, aaga bandhiga "bokiska gareeyga ah", qolalka shirka/kulanka, iyo hoteel laseexo oo leh WiFi. [Kasoo dagso bandhigyada sooharay halkaan](#) (.pptx format). Qaybaha sooharay waa xafiisyada maamulka ee Seattle Office of Arts & Culture (Xafiiska Farshaxanka iyo Dhaqanka ee Seattle).

Yaa naqshadeeyay oo dhisay xarunta dhawaan dib loodayactiray?

Dayactirkaan cusub ee lagu sameeyay dabaqa sadexaad, [Olson Kundig](#) ayaa Naqshada iyo Fikrada Madxafka lahaa. [Schacht Aslani Architects](#) ayaa iskalahaa qaab dhismeedka. [Centennial Contractors Enterprises, Inc.](#) ayaa fulisay qandaraaska.

Waa sidee goobta taariikhiga ah?

Waa goob wareegsan, furan, qadiimi ah, oo hool sidiisa udhisan, waana mid kamid ah naqshadaha sii dabar go'aaya oo bartamaha magaalada kuyaala. Waxay ufurantahay saqafka dhismaha, kaasoo kakoreeya kudhawaad 12 feef darbiga ilaa 35 feet na kakoreeya caarada kore ee gurigga. Wuxuu leeyahay qaab dhismeed hool (labadaba dhismihii 1906 iyo dib udayactirka lagu sameeyay 2010) kaasoo kumeersan dhamaan xarunta, daloolo, biyo mareeno, iyo nidaamyada kale ee farsamo. Waxaa jiro xirmooyin biro ah oo kudhisan kudhawaad 15 kii feet kasta xarunta oo dhan.

Wa sidee jadwalka xaruntu?

- Abriil - Juun 2016: Qorshaynta iyo Diyaarinta
- May - Deseembar 2016" Kulanada Bulshada
- Janaayo - Abriil 2017: Diyaarinta xog aruurinta qabyada ah iyo soobandhiga xog aruurinada bulshada
- Janaayo - Luuliyo 2018: iyaarinta Qorshaha Barnaamijyada Xarunta ARTS @ King Street Station
- May - Nufeembar 2018: Dhismaha
- Nufeembar - Deseembar 2018: Office of Arts & Culture ayaa raraaya xafiisyadiisa
- Janaayo 2019: Bandhiga koobaad, [yehaw](#), ayaa bulshada loofurayaa

Intay socotay qorshaynteenaa mudada dheer, hawlo doceed ayaa kadhacay xarunta King Street Station sanadaha 2015-2017.

- [Kagarsoomida isha 2015](#), soosaarista 5 ee aasaasiga ah, Agoosto 2015
- [Talaabooyinka Miisanka leh](#), soosaarista 5 ee aasaasiga ah, Maarso 2016
- [Ku-meelgaarka](#), Farshaxanka Iskudhafka ah, May 2016
- [TUF LUV](#), Barnaamijyada Iskudhafka ah ee TUF, Juun 2016
- [Kagarsoomida isha 2016](#), soosaarista 5 ee aasaasiga ah, Agoosto 2016
- [9e2](#), Oktoobar 2016
- [The Bureau of Arts & Culture \(Laanta Farshaxanka iyo Dhaganka\)](#), Vsoosaarista 5 ee aasaasiga ah, Deseembar 2016
- [Truth B Told](#), Fanka Farshaxanka ONYX, Janaayo-Feebaraayo 2017
- [Xadka + sii jiray](#), Office of Arts & Culture ee Seattle Agoosto-Oktoobar 2017

Sidee ayaan uga qaybgali karaa? Waxaan xiisaynyaa inaan goobtaan adeegsado; sidee ayaan codsi udirsan karaa?

Laga bilaabo bartamaha sanadka 2018, waxaan furayaa nidaamka martiqaadka codsiga ee bulshada looga qaybgalinaayo, ayna kujiraan talobixin, hawlo samofal ah, iyo soogudbinta codsiyada bandhiga iyo barnaamijka. [Iskadiiwaangali wararkeena](#) nagalana soco baraha bulshada sida [Facebook](#), [Twitter](#), [Instagram](#), [YouTube](#), iyo bogeena qoraalada ee [ArtBeat Blog](#), si aad uhesho bayaanada aan soosaarno.

Sidee ayaad uqorshaysaan kaqaybgalinta bulshada qaabka aad xarunta u adeegsanaysaan?

Faahfaahin aasaasi ah Sanadkii 2016, Office of Arts & Culture ayaa bilaabay kulano lala qaadanaayo bulshada oo lagu qabanaayo King Street Station ayado laraacaayo sharuucda Race and Social Justice Initiative (RSJI, Haayada Isirka iyo Cadaalada Bulshada) Waaxdeeda Racial Equity Toolkit (RET, Arimaha Sinaanta Bulshada). Kulanadaan waxaa kashay [Warbixinta Xog aruurinta bulshada ee Xarunta King Street Station](#). Aqoonyahano kasocdo UW Evans School of Public Policy and Governance (Dugsiga Siyaasada Dadwaynaha iyo Maamulka ee UW Evans) ayaa si madax banaan u abuuray [Qaybta hartay ee xarunta King Street Station dhamaan Xarumaha Waaxda Isirka iyo Sinaanta bulshada](#).

Anagoo raacayna labada warbixinoodba, waxaan aburnay [Qorshaha Barnaamijyada ARTS @ King Street Station](#) si loomuujijo shaqada heerka sare ah ee gobalka laga sameeyay.

Waa maxay Race and Social Justice Initiative (RSJI) Waaxdeeda Racial Equity Toolkit (RET)?

The [Race and Social Justice Initiative](#) waa qorshe ay abuurtay ayna dhaqangalisay Magaalada Seattle sanadkii 2005. Waa astaan muujinaysa dadaalka magaaladu ugu jirto kalaqaybsanaanta bulshada loona gaari lahaa sinaan bulsho inay kadhacdo Seattle. Waa barnaamijkii ugu horeeyay oo noociisa ah lagana hirgaliyo Maraykanka. Laanta [RET Toolkit](#) waa su'aalo xariira kuwaasoo magaalada kacaawiya naqshadaynta arimaha jira iyo mashaariicda dhinacyada isirka iyo cadaalada bulshada.

Marka laga hadlaayo xarunta King Street Station, RET toolkit waa qaabka aan uqiimayno mashruuca, si aan uxaqiijiyo inaan kafiirsanayno arimaha laxariira cadaalad darooyinka taariikhiga ah oona bulshada kadhaxjira iyo isir nacaybka kajira laamaha bulshada intaan kujirno qorshaynta iyo fulinta mashruuca.

Waxaan doonayaa inaan kakiraysto goob aan munaasabad kuqabsado xarunta King Street Station. Yaan laxariirayaa? Waa meeqa qiimuhu?

Waqti xaadirkaan ma qabanayno codsiyada kiraystayaasha. Wixii kusaabsan isticmaalka goobaha kuyaala dabaqa koobaad (qolka wayn ee sugitaanka) laxariir Amtrak si toos ah adoo kalaxariiraaya Alice.Rose@amtrak.com.